Taageer Ardayda iyo Qoysaska

Sida ay dhammaanteen inoo soo faadsaartay kalsooni daradii ayaa iyagana sidoo kale ardayda iyo qoysaskoodii ay inala qeybsadeen qulubka iyo welwelkii la xiriiray doorashadii dhacday bishii Noofember iyo waliba natiijadii ka soo baxday,xanuunka faafaya iyo dhaqaalaha hoos u dhacay, kacdoonada ku salaysan dhinaca jinsiga, iyo isbedelka ku dhacay cimilada. Waxa aan ka warqabnaa ardaydeena Madow, kuwa asalka ah iyo ardayda midabka ah, iyo qoysaskoodaba ay u soo waajahday iyagana welwel ka xoog badan kana gedisan.

Sidii loogu fidin lahaa taageero, waxaan isku soo habeynay taageero dhinaca gudaha iyo dibadaba leh, iyada oo liistada iskuulada PPS laga helayo Taageer Qoyska iyo Liistada Ardayda(Menu of Student and Family Supports). Buug-yarahani waxaad ka heli kartaa waxyaabaha aan hadda bixino iyaga oo aan dib u habeyn cusub ku sameynay sidii ardaydayada iyo qoysaskoodu ay si dhib yar u heli lahaayeen taageeradaa inta lagu gudo jiro waxbarashada ay ardaydu guryaha ku qaadanayaan.

Agabyo Dheeraad ah

U Addeegida Qoysaska Muhaajiriinta ah:

Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS) waxaa ka go'an in ay abuuraan jawi nabadgelyo lehna waxbarasho ay u dhan yihiin dhammaan ardeydeenu iyada oo aan loo eegin midabkooda, lab/dhedig midka ay yihiin, diintooda, asalkooda, ama inay wadanka sharci ku leeyihiin iyo in kale. Linkiga hoos ku qoran wuxuu siinayaan qoysaska muhaajiriinta ah liistada ay ka fiirsadaan agabyada ay u baahan yihiin.
https://www.pps.net/domain/4352

Iskaashiga RESJ:

Dugsiayda Dadweynaha Portland(PPS) waxa ay sii wadi doonaan inay la sameeyaan iskaashi hay'adaha si gaar ah ugu addeega ardaydeena addeegaasi oo ku salaysan dhaqankooda. Linkiga xagga hoose ku yaala wuxuu muujinayaa hay'adaha aan iskaashiga la leenahay sidii ay u gargaari lahaayeen ardayda.
https://www.pps.net/Page/15401

ACLU – Ogow Xuquuqdaada

Qof kastaa wuxuu leeyahay xuquuq aasaasi ah oo uu damaanad qaadayo Dastuurka Wadanka Maraykan iyo Xeerarka Xuquuqda Shacbiga. Wax badan ka ogow oo ku saabsan xuquuqdaada oo ay ka mid yihiin sida loo isticmaalo xuquuqdaada, iyo waxa aad u baahan tahay inaad sameyso marka xuquuqdaada lagu xadgudbo.
https://www.aclu.org/know-your-rights/

Filashooyinka Maalinta iyo wixii ka Baxsan.

Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS) waxa ay isku diyaarinayaa dhawr xaaladood inay dhici karaan taasi oo sababi karta inay timaado sanadkani kacdoon shacbi. Hoos waxa ku faahfaahsan macluumaad Hoggaanka PPS ay u adeegsan doonaan go'aan qaadashada inta lagu jiro toddobaadka doorashada.

Shuruudaha Dhismaha Lagu Xidhayo Todobaadka Lagu Jiro Calaamo-Saarka.

Badbaadada Shaqaalaha

- Dibadbaxa qalalaasaha wata ee kambaska
- Qalalaasaha ka socda kambaska agtiisu wuxuu ka horjoogsanayaa shaqaalaha inay shaqada u yimaadaan ugana tagaan si badbaado leh

Waxyeelada Dhismaha ee Baaxadda leh

- Daaqado jajaban
- Hadal nacayb wata oo baaxad leh
- Waxyeelada dabka
- Adeegyada sida laydhka/biyaha oo la waayo

Imaanshaha Ardayda ee Inta Dibadbaxyadu Socdaan

- PPS ma kafaalo qaadayso wax dibadbaxyo ardaydu horseed u tahay ah, laakiin waxaanu aqoonsannahay xuquuqda dastuuriga ah ee ardaydu inay ra'yigooda cabbiraan.
- Iyadoo ay ugu Wacan tahay Waxbarashada Onlaynka ah ee Dhammaystiran, dibadbaxyada ardaydu horseedka u tahay ee dhulka dugsigu ma arbushayaan waxbarasho fasal. Shaqaalaha PPS (macallimiinta, shaqaalaha taageerada) waxay sii wadi doonaan shaqadii muddaysnayd, ha noqoto mid onlayn ah ama meel kaleba, iyagoo la shaqaynaya ardayda wali ku sii jira waxbarashada onlaynkak ah, ilaa maamulka dugsigu wax kale u sheego ma ogiye.
- Imaanshaha CDL inta lagu jiro, imaanshuhu wuxuu ku dhici karaa xaadirista kulan fasal oo onlayn ah, ardayda oo shaqo gudbinaysa, ama ardayda oo la xiriiraysa macallinka. Hababkani waxay u oggolaanayaan dabacsani ardayda u baahan inay ka galaan oo helaan agabka wakhtiyo kala duwan maalin kasta oo wax la dhiganayo. Dabacsanaantaas darteed, la socoshada imaanshaha tooska ah ee dibadbaxyadii hore hadda wakhtigan CDL-ka suurtogal ma aha. Kaqaybqaadashada ardaygu ma keenayso maqnaansho haddii uu wado galintaanka daaqadda 24-ka saac ee maalinta fasalka oo uu shaqadna dhammaystirayo.

Muddaynta Go'aanada	• EOC waxa ay shiri doonaan todobaadka 1/20 iyada oo ka dibna loo qorsheyn doono marba sida ay lagama maarmaan u tahay. • EOC waxa ay qiimeyn doonaan xaaladaha markaasi `jira iyaga siin doona tallo soo jeedin ku saabsan xiritaanka Guddoomiyaha Waxbarashada.
Kambasyada Halis Badan ugu Jira Dabadbaxyada marka la eego goobta iyo/ama magaca dusiga/ maskot (lama oga wax halis ah wakhtigan)	• Lincoln • Jefferson • Franklin • MLC • Chapman • Bridlemile • Wilson • Grant • Scott
Dadaalada Yaraynta si loo Ilaaliyo Kambasyada Halista Badan ku Jira	• Daboolidda daaqadaha halka taallooyinku ka muuqan karaan • Ciidan nabadsugid oo dadaalaya • Qaylodhaano soo galista halka mar ah sheegaya
Jawaabta & Soo Kabsashada-Xeeladaha Hagaajinta Waxyeelada Dhismaha	• Kordhinta tirada dayactirka heeganka ah • Qandaraas xaaladda gurmadka ah wixii nadiifin/dayactir ah

Dugsiga Kusalaysan - Hawlaha Fool-ka-foolka oo Xaddidan	• Hawlgallada
	  ○ Dayactirka
	  ○ Ilaalinta
	  ○ Nabadsugidda
	  ○ Adeegyada Nafaqada
	  • Qaybinta cuntada: Isniin/Arbaca/Jimce. 3:00 -4:30
	  • Uu kujiro gaadiidka - cuntooyinka guryaha la keenayo Isniin/ Arbaca/Jimce 8:00gh-1:30gd
	  ○ Dhismaha
	  ○ Qaybinta IT-ga
	  ○ Qaybinta manhajka
	  • Uu kujiro gaadiidka
	• Waxbarashada
	  ○ Taageerada CDL (maamulka iyo baraha)
	  ○ Ciyaaraha
	• Dhinaca 3aad / Cid Kale
	  ○ Daryeelka ilmaha

Tilmaamaha Hadalada Siyaasadaysan

Doorkayaga barayaal iyo shaqaalaha dadwaynaha ahaan si cad ayuu u qeexan yahay marka la eegayo hadalada siyaasadaysan. Sharciga Oregon si aad ah ayuu u xaddidaa hawlaha siyaasadeed ee ay ku kici karaan shaqaalaha dadwaynuhu inta lagu jiro saacadaha shaqada. Sida uu dhigayo sharciga Oregon ee "Ololaynta Shaqaalaha Dadwaynaha", ORS 260.432, shaqaalaha dadwaynaha looma oggola, inta saacadaha shaqada ay kujiraan, inay taageeraan ama diidaan codsiyada siyaasadda, murashaxiinta, guddiyada siyaasadeed ama u codaynta arrimaha.

Si ay aad ugu sii caddayso, waaxdeena sharciga PPS waxay iftiimisay hawlo iyo tusaalayaal gaar ah oo khuseeya sharcigan. Hagitaankan waxa laga heli karaa halkan:

(Tilmaamaha Ololaha ee Shaqaalaha Dadwaynaha)

Sidoo kale waxa muhiim ah kala saaridda hadalka ayidaya qiyamkeena iyo himiladeena iyo hadalka siyaasadeed. Gaar ahaan, luuqadda taageeraysa qiyamkeena sinnaanta qoomiga ah iyo caddaaladda bulsheed ma aha hadal siyaasadaysan. Sidoo kale waxaynu fahamsanahay in **Black Lives Matter (BLM)** uu noqon karo wax la isku khilaafsan yahay marka la eego xubnaha bulshada qaarkeed, PPS-na waxay dhiirigelinaysaa dood wanaagsan in laga yeesho tan iyo arrimaha kale ee taagan. BLM waa bayaan caddaaladda bulsheed ah oo waafaqsan ballanqaadkeena inaynu si dhab ah u ayidno aqoonsiyada ardaydeena, qoysaskeena iyo shaqaalaheena. Taageeridda BLM ma aha bayaan siyaasadeed, mana aha wax la xiriira murashax gaar ah ama olole siyaasadeed. Ma aha xadgudub ka dhan ah siyaasaddeena shaqaalaha ama ardayda inay haystaan shayo BLM ku calaamadsan tahay, sida dharka, saxeexyada iimeylada, iwm.

Habraacyada Khudbadaha Naceybka Xambaarsan ee Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS)

Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS) uma dulqaataan khudbadaha naceybka xambaarsan sidoo kale ficilada midab-takoorka. Sanadkii 1977, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay qabantimeen Siyaasad Takoorida Ka Soo Horjeeda/ Cago Jugleynta taasi oo wax ka bedel iyo kaabis lagu sameeyey sanadahaasi oo dhan si looga hortago xaaladaha dhawaan isa soo taraya. Ujeedadda siyaasadani waxa ay tahay sidii dhaqanka ardayda loo ilaalin lahaa, qoysaska iyo shaqaalahaba loo dhigayo hab lagu ilaaliyo, kuwaasi oo la siinayo nidaamkii loo marayey cabashada iyo wargalinta sidii loo xaqiijin lahaa dhammaantooda nabadgelyadooda iyo fayo-qabkoodaba. Dugsiyada degmadu waxa kale oo ay ilaaliyey qeybaha bulshada arrimaha ay ka mid yihiin: da'dooda, asalkoodu meesha uu ka soo jeedo, laxaad la'aantooda, awoodooda dhaqaale, jinsigooda, diintooda, lab iyo dhedig midka ay yihiin, nooca galmadooda iyo jinsiga uu isku aqoonsan yahay. Siyaasadani waxa sidoo caddeyneysaa waxa ka dhalan kara dadka isticmaala inay dadka takooraan, shaqaalaha shaqada ka cayriya iyo waalidiiinta iyo mutadawiciinta xadgudba.

Si jawaab looga bixiyo korodhka tirada dhacdooyinka hadalada nacaybka xambaarsan, kooxo kala duwan ayaa ka shaqeeyey sidii loo horumarin lahaa tiro tallaabooyin si joogta ah uga jawaabceliya dhacdooyinkani. Waa kuwani tilmaamaha iyaga oo kooban Habraaca Khudbadaha Xambaarsan Nacaybka ee Dugsiyada Dadweynaha Portland. ƏHabraacyadani waxaa ka mid ah hagayaasha ogeysiinta,warbixinta iyo taageerida xiriirka. Haddii dhacdo hadalo nacayb xambaarsan ay dhacdo, dhammaan shaqaalaha waxaa lagu boorinayaa inay helaan habraacyadani ka dibna ay raacaan. Waxaa lagama maarmaan ah in si joogta ah 1) falkani loo cambaareeyo; 2) dib u xaqiijin lagu sameeyo sharafta qiyamka sinaanta Dugsiyada Dadweynaha Portland iyo cadaalada bulshada; iyo 3) lana taageero ardayda bartilmaameedsaday.

Si kastaba ha ahaatee marka la raaco habraacyadayada, waxa aan sidoo kale ku wargelineynaa qof kastaa inuu ka foojignaado calaamada ku suntan nacaybka marka ay isticmaalayaan muuqaal baahiyaha iyo raadka ay ku reebeyso ardayda bee'ada ay joogaan. Ururka Ka Hortaga Sumcad Dilka wuxuu ururiyey xogta lagu garto nacaybka. kuwaas oo la weydiiyey inay shaqaaluhu taxadir ka ahaadaan soona gudbiyaan cid kasta oo calaamadahani ku isticmaasha meel kasta oo ka mid ah iskuulada.

Xilligani dayrta, Golaha Waxbarashada Gobolku waxa ay qabatimeen xeerka lagu magacaabo Dhammaan Ardaydu Waa Wada Leeyihiin kaasi oo mamnuucaya calaamada muujinaya nacaybka, gaar ahaa saddexda loogu aqoonsi badan yahay dhinaca nacaybka wadanka Maraykan –the swastika (waxaa loo isticmaalay wax ka baxsan macnihii diimeed ee markii hore ay xambaarsaneyd), Calankii Midowga, iyo xadhigii dadka lagu daldali jiray. Xeerkaasi ku meel gaarka wuxuu dhaqangal noqday bisha Sebtamber 18, 2020. Waxaana looga baahan yahay dugsiyad degmadu qabatimaan iyaga oo meelmarinaya siyaasadaha iyo nidaamyada mamnuucaya in la isticmaalo ama la soo bandhigo xadhigaasi dadka lagu daldali jiray muujinaya, calaamada diineed ee macnihii hore ee ay lahayd laga qaaday loona isticmaalo nacaybka iyo calanka midowga barnaamijka kasta oo iskuuladu ay soo qababqaabiyeen marka laga reebo marka manhajka waxbarashada ee loo isticmaalayo kaasi oo la jaanqaadaya Heerarka Gobolka Oregon marka la gaaro bisha Janaayo 1,2021. Golaha Waxbarashada PPS waxa ay tixgalin doonaan inay dib u cusbooneysiiyaan siyaasadani bisha Noofember gudaheeda sidii loo qabatimi lahaa loona meelmarin lahaa waxyaabaha cusub ee lagu soo kordhiyiey iyada oo loo sameyn doono waqtiga kama dambeysta ah.

Agabyo dheeraada waxaa laga heli karaa halkan: PPS.net/ResponsetoHateSpeech

Waxa sidoo kale muhiim ah in la kala saaro faraqa u dhexeeya hadalka nacaybka xambaarsan iyo hadalka siyaasadadeedka. Hadalka nacaybka xambaarsani ma ilaalineyso "qofku inuu si xor ah u hadli karo" isla markaasi Dugsiyada Dadweynaha PPS iyo siyaasadaha Gobolkuba waxa ay mamnuuceen isticmaalka hadalka nacaybka xambaarsan. Hoos waxaa ku qoran shan waxyaalood oo aad iskaga difaacayso hadalada nacaybka xambaarsan iyo tallo soo jeedimaha dhabta ah ee dib loogu jihaynayo sidii looga hortagi lahaa Iskuulada Cadaanka Sheegta Inay Dadka Kale Ka Sareeyaan oo ay saarta Xarunta Gobolka Galbeedka:

Isdifaacida Guud Hadalada Naceybka Xambaarsam

"Waa isla weynaan ee maaha xaqiraad "

Isla weynaanta cadaanka lama garab dhigi karo bisha la taageero Sharafta bulshada LGBTQ, Sharafta Dadka Dhaladka Wadanka Maraykan, sharafka Laatiinaha ama maalinta loo dabaaldego Horumarka ay Dadka Madow sameeyaan.

Kooxaha asal ahaan kala gedisan ama taariikh ahaan la faquuqay ay waxa ay u kulmaan sidii ay u muujiyaan sharaf ahaan sida ay uga xun yihiin taariikhdaas iyo cunsurinimada hadda iyo waliba cunsurimidaa dhinaca dhaqanka.

"Tani waa arrimaha hadalka xorta ah "

Hadalada Naceybka xambaarasan ma siinayo wax damaanad qaad ah hadalka.

Siyaasado fara badan oo sharci ahaan la taageeray sidii loo garab istaagi lahaa xuquuqaha ardayda mamnuucaya hadalada naceybka xambaarsan.

Waxa aan mas'uul ka nahay sidii aan u dhisi lahayn arday leh dhaqan nabadoon. Hadalka khatar galinaya nabadgelyada arday walba, gaar ahaan kuwa uu sharciga ka ilaaliyey looma dulqaadanayo Dugsiyada Dadweynaha Portland.

Golaha Waxbarashada sidoo kale waxa ay mamnuuceen calaamadaha muujinaya naceybka, gaar ahaa saddexda inta badan aadka loo aqoonsado inay yihiin calaamado u taagan naceyb wadanka Maraykan.- the swastika(waa erey diimeed si qaldan oo naceyb ah loo isticmaalay), calankii MIdowga, iyo xarigii dadka madow lagu daldali jiray.

"Tani waa sidii loo taxadiri lahaa ereyo dadku dhibsadaan ee halyeyda cadaalada bulshada "

In la mamnuuco hadalka naceybka xambaarsani maaha dadaalada in laga taxadiro ereyada dadku dhibsanayaan ama la isku dayayo in la xadeeyo doodaha.

In laga shaqeeyo sidii loo abuuri lahaa jawi nabadgelyo iyo togan kuwaasi oo iskuuladu yeeshaan lana jaanqadaya qiyamkeena iyo himiladeena.

Halkani waan labo erey oo isticmaalkooda la isweydaariyey iyada oo ujeedadoodii laga leexiyey. In aad isku taagto kuwa ku jeesjeesay iyaga oo difaacaya madax adeyga isla weyn lagu bedelo marka koowaad "ixtiraamka ugu yar ee dadka kale"marka labaad "dadka ka soo horjeeda cunsurinimada."

Tallooyinka Dhab ah oo Dib Loogu Jiheeyey

Himilada PPS – Sawirada Qalin-jabinta una taagan himilada dugsiyada degmada

Tognaan,Isku kalsoon,Leh Dareen Ku Xiran Naftiisa: Xiriirka ardaydu waa mid wax ku ool ah iyaga oo abbaabulaya, qoraaya, ka hadlaya, iyo iyaga oo si cad u soo bandhigaya, si macquul ah,qancin leh,waxyaabaha ugu muhiimsan. Waxa ay fahamsan yihiin muhiimada uu leeyahay dhaqanka, waqtiga, goobta, iyo macnaha guud ee uu leeyahay qaabka ugu haboon ee loo xiriirayo kaasi oo loola qabsan karo dariiqyo ay ku xiriirayaan xaalado kala duwan.

Xiriirka wax ku oolka ahi wuxuu leeyahay awood lagu mideeyo faraqa inoo dhexeeya oo dhan.

Isbedelada Hoggaamiyaasha Sinaanta sinjiga: Xiriirka ardaydu waa mid wax ku ool ah iyaga oo abbaabulaya, qoraaya, ka hadlaya, iyo iyaga oo si cad u soo bandhigaya, si macquul ah,qancin leh,waxyaabaha ugu muhiimsan. Waxa ay fahamsan yihiin muhiimada uu leeyahay dhaqanka, waqtiga, goobta, iyo macnaha guud ee uu leeyahay qaabka ugu haboon ee loo xiriirayo kaasi oo loola qabsan karo dariiqyo ay ku xiriirayaan xaalado kala duwan.

Xiriirka wax ku oolka ahi wuxuu leeyahay awood lagu mideeyo faraqa inoo dhexeeya oo dhan.

Isbedelada Hoggaamiyaasha Sinaanta sinjiga: Mark aad eegto hoggaamiyaasha jinsiga, ardaydu waxa ay ka qeybqaataan sidii ay uga dhigi lahaayeen bulshadeena mid cadaalad leh oo dadka madow ay la siman yihiin dadka kale. Waa kuwa fahamsan sida ay bulshadeena u raadeysay cadaalada darada sinjigu, waxa ay aqoonsan karaan iyaga oo carqaladeynaya xaaladaha ay karaan. Waxa ay abuureen hay'ad iyo xirfado ay ugu doodayaan inay iska caabiyaan cadaalad daradda iyo inay bedelaan nidaamyada bulsahdayda camburinaya.

Waxa aan aaminsanahay xuquuqaha aassaasiga ee sharafta bani'aadamka kuwaasi abuura in loo baahan yahay duni loo siman yahay nidaamka waxbarasho ee si cad looga fagoooyey- iyo in la dhiso hoggaamiyaal ka hortago nidaamyada wax cabudhiya.

Isdifaacida Guud Hadalada Naceybka Xambaarsam

Tallooyinka Dhab ah oo Dib Loogu Jiheeyey

Himilada PPS – Sawirada Qalin-jabinta una taagan himilada dugsiyada degmada

"Maxay ku saabsan tahay cunsurinimadu ?"

Xog ayey waxa ay iftiimineysaa in dadka cadaanka ahi faa'iido ku qabaan dhammaan dhinac kasta oo nolosha Maraykan ah. Marka aad eegto qeyb kasta oo ka mid ah xubnahaas inay gali karaan eex ay ka eexanayaan dadka kale, ficiladdani kuma soo kordhin hay'ad ahaan iyo cunsurinimada dhinaca dhaqanka kuwaasi oo si aan loo sineyn u soo saaray natiijo taban oo ku aadan dadka midabka ah.

"Midab-kala soocii waa dhammaadaye?"

Tan iyo dhacdooyinkii foosha xumaa ee rabshadaha gacan ka hadalka lahaa xaggaagani, bulshooyinkeena iyo dalku waxa ay aqoonsadeen taariikhdaas khatarta ee ku milan hay'adihii dawlada iyo dhaqanka cunsuriga ah ee ilaa maanta ku jira nidaamkeena.

Waxa aan ka warqabnaa midab-takoor ku dhisan dhacdooyinka hadalada naceybka xambaarsan oo aad u kordhay afartii sanno ee la soo dhaafay.

Waxa inoo taala hawl u baahan inaan wada qabno, sidoo kalena wax aan u baahanahay in aan dhageysano sidii aan u fahmi lahayn iyada oo midba midka kale rumeysanayo waayo-aragnimadiisa.

Milicsiga,Naxariista iyo Awoodsiinta Qalin-jabiyaasha Dugsiyada: Ardaydu waxa ay ka warqabaan naftooda, milicsiga, iyo aqoonsiga eexda shakhsiyeed ee dadka, dhaqanada iyo xaaladaha. Waxa ay shaqeeyaan awood ku salaysan sida ay wax u arkaan kuna soo bandhigaan naxariis, waxa cajab galiya, ixtiraam, iyo xiisaha ay u qabaan sida kale ay wax u arkaan. Waxa ay raadiyaan sidii ay u xoogeyn lahaayeen dadka kale iyaga oo aqbalaya, mahadna u haya, naxariisna leh iyo naxariis ay u qabaan dadka kale.

Waxa aan aaminsanahay xuquuqaha aassaasiga ee sharafta bani'aadamka kuwaasi abuura in loo baahan yahay duni loo siman yahay nidaamka waxbarasho ee si cad looga fagoooyey- iyo in la dhiso hoggaamiyaal ka hortago nidaamyada wax cabudhiya.

Mufakiriin Leh Fikrada Qoto dheer oo ku Ladhan Yahay Cilmi Gun Dheer: Ardaydu waxa ay akhriyi karaan iyaga oo falanqeynaya xogta, su'aalo iska weydiinaya kuwa iyaga khuseeya, iyo inay abuuraan dood ku salaysan xaqiiqooyin iyo cadaymo. Waxa ay baaritaan ku sameyn lahaa taariikhda iyaga oo ka eegayo dhinacyo kala gedisan sidoo kalena fahmaya sida, dhaqan ahaan, sheekooyinka taariikheed ay u qaabeeyeen dhaqanka xooga leh, iyo waliba sida arrinka doodiisu taagan tahay ay u qaabeyso dhacdooyinka cusub.

Waxa aan ka warqabnaa sidii looga noqon lahaa cadaalad daradii qarniyaal la soo maray iyo sidii loo dhisi lahaa dugsiyada degmada oo loo siman yahay cadaaladna lagu dhaqayo, waa in aan sii wadnaa inaan noqono kuwa ay ka go'an tahay adkaysina u leh jinsin siman iyo bulsho cadaalad ku nool.